Washington State Health Care Authority

washington healthplanfinder
click. compare. covered.

Xuquuqda iyo Waajibaadyada Caymiska Daryeelka Caafimaadka

Dokumentigan waxaa uu ka kooban yahay:

- **Qaybta 1aad** Dhammaan barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka
- **Qaybta 2aad** Washington Apple Health oo kaliya
- **Qaybta 3aad** Qorsheyaasha qualified health oo kaliya
- **Qaybta 4aad** Cabasho soo gudbi

1. Dhammaan barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka

Xuquuqdaada

Washington Health Benefit Exchange iyo Health Care Authority waa in ay:

Kugu caawiyaan in aad akhrisid oona buuxisid dhammaan foomamka la codsaday. Washington Health Benefit Exchange (HBE) wuxuu maamulaa Washington Healthplanfinder, halkaasi oo aad tageyso marka aad codsaneyso oo aad maareynayso caymiskaaga caafimaadka iyo ilkaha. Si aad caawimaad u hesho waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-923-4633. Haddii aad tahay shakhsi waayeel ah, indhoole ah ama naafo ah ama u baahan taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer (LTSS) waxaad kala xiriiri kartaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) lambarkan 1-877- 501-2233.

Ku siiyaan adeegyada turjumaanka afka ama qoraalka ah oo lacag la'aan ah iyadoo aan dib u dhac jirin marka aad la hadlayso HBE, Health Care Authority (HCA), ama DSHS. Waxaad codsan kartaa turjumaan waqti kasta ee aad nala soo xiriirto.

Ka dhigaan macluumaadkaaga shakhsiyeed kuwo sir ah laakiin waxaynu la wadaagi doonaa macluumaadka qaarkooda wakaalado gobol ama dowladeed kale ee loogu talogalay ujeeddooyin u qalmitaan iyo qorid. Akhri Siyaasadda Asturnaanta HBE **wahealthplanfinder.org/us/en/privacy-policy.html**.

Ku siiyaan fursad aad ku qaadato racfaan haddii aadan waafaqsanayn go'aanka ay gaareen HBE ama DSHS ee saameynaya xaq-u-yeelashadaada caymiska caafimaadka, taageerada iyo adeegyada muddada-dheer (LTSS), qorshe caafimaad, caawimaadda canshuur dhaafka lacagaha caymiska caafimaadka ee joogtada ah (premium) ama dhimista kharash-wadaag. Codsiga racfaanka, kiiskaaga dib ayaa loo eegi doonaa. Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka rafcaannada HBE adiga oo booqanaya **wahbexchange.org/contact-us/appeals** ama kala xiriiraya Xarunta Taageerada Macmiilka Washington Healthplanfinder 1-855-923-4633. Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan rafcaannada barnaamijyada DSHS, kala xiriir DSHS 1-877-501-2233 ama booqo Xafiiska Adeegyada Guriga iyo Bulshada ee degaankaaga. Waxaa laguu jadwaleyn doonnaa Dhageysiga Maamulka La Xiriira haddii rafcaanka loogu talagalay go'aanka ku saabsan caymiska Washington Apple Health (Medicaid).

Kuula dhaqmaan si daacadnimo ah. Midab takoorku waa mid lid ku ah sharciga. HBE iyo HCA waxay u hoggaansamayaan sharciyada xuquuqaha madaniga ah ee Federaalka oo kulama kacaan takoor ku saleysan isirkooda, midabkooda, asal ahaan dalka ay ka soo jeedaan, da'dooda, naafonimadooda, ama jinsigooda. HBE iyo HCA kama reebaan ama ulama tacaamulaan dadka si kala duwan oo sabab u ah isirkooda, midabkooda, asal ahaan dalka ay ka soo jeedaan, da'dooda, naafonimadooda, ama jinsigooda.

HBE iyo HCA waxay u hoggaansamaan sharciyada gobolka la dabakhi karo mana ku sameeyaan dadka midab takoor ku salaysan caqiido, jinsi, aqoonsiga ama muujinta jnsiga, dookha galmo, xaalada guur, diin, looga saaray si sharaf leh xaalada ciidan ama halyeeynimo hore, ama isticmaalida hagid eey tababaran ama adeeg xayawaan la siiyo qof naafo ah.

HBE iyo HCA:

- Waxay siiyaan dadka qaba naafada adeego iyo gar-gaaro si ay noogula xiriiraan si wanaagsan, sida:
  - Turjubaano luuqada indhoolayaasha ah oo aqoon u leh
  - Macluumaad qoran oo qaabab kale ah (far waaweyn, dhagaysi, qaabab qoraalo eliktaroonig ah oo la heli karo, iyo qaabab kale)
- Waxay siiyaan adeego luuqad bilaash ah dadka aan luuqadooda aasaasiga ahi ahayn Ingiriisi, sida:
  - Turjubaano aqoon leh
  - Macluumaadka ku qoran luuqadaha kale Haddii aad u baahan tahay adeegyadan, la xiriir 1-855-923-4633.

Haddii aad aaminsan tahay in HBE ama HCA ay ku guuldareysteen bixinta adeegyadan ama loo takooray qaab kale waxaad cabasho u soo gudbin kartaa:

- **Washington Health Benefit Exchange Legal Department**
  ATTN: Legal Division Equal Access/Equal Opportunity Coordinator
  PO Box 1757
  Olympia, WA 98507-1757
  1-855-859-2512
  Fakis: 1-360-841-7653
  appeals@wahbexchange.org

- **Health Care Authority Division of Legal Services**
  ATTN: Compliance Officer
  (ADA/Nondiscrimination Coordinator)
  PO Box 42704
  Olympia, WA 98501-2704
  1-855-682-0787
  Fakis: 1-360-507-9234
  compliance@hca.wa.gov

Waxaad cabashada ku xaraysan kartaa qof ahaan ama boostada, fakiska, ama iimaylka. Haddii aad u baahantahay in gacan lagaa siiyo soo gudbinta cabashada, Waaxda Sharciga Washington Health Benefit Exchange ama Qaybta Adeegyada Sharciga ee HCA ayaa diyaar u ah in ay ku caawiyaan.

Waxaad sidoo kale ugu gudbin kartaa cabashada xuquuqaha aadanaha Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah, boostada, email, telefoon, ama barta internet-ka:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
Telefoonka: 1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)
Iimayl: **ocrmail@hhs.gov**
Online-ka: **ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf**

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa: **hhs.gov/sites/default/files/ocr-cr-complaint-form-package.pdf**

Mas'uuliyadahaaga

Waa in aad bixisaa Lambarka Damaannada Bulshada (SSN) ama lambarka dokumentiga socdaalka haddii aad mid haysato. Haddii aadan haysan SSN ama dokumenti socdaal, waxaad weli codsan kartaa caymiska daryeelka caafimaadka laakiinse waxaa laga yaabaa in aadan xaq u lahayn dhammaan barnaamijyada kaalmada maaliyadeed. Waxaan macluumaadkan u adeegsanaynaa in aan ku eegno xaq-u-yeelashadaada barnaamijyada isaga oo xaqiijinaya aqoonsigaaga, muwaadinimadaada, xaalkaaga socdaalka, taariikhdaada dhalashada, iyo helitaanka caymiska kale ee daryeelka caafimaadka. Lama wadaagayno macluumaadkan wakaalad socdaal kale. SSN ayaa loogu baahan yahay canshuur dhaafka iyo barnaamijyada qaarkood.

Haddii aadan bixin SSN ama lambarka dokumentiga socdaalka ee loogu talagalay naftaada ama qof reerkaaga ka tirsan, waxaan u baahan karnaa in aan kuula soconno si aan kaaga helno macluumaad dheeraad ah. Bixi macluumaad ama caddeyn kasta ee loo baahan yahay si loo caddeeyo haddii aad xaq u leedahay, haddii ay hay'addu codsatey.

Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid

Waxaa jira sharciyo gobol iyo federaal gaar ah oo xukuma hawlgalka Washington Healthplanfinder iyo nidaamyada codsiyada ay dawladu maamusho, xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadaha sida qof isticmaala iyaga iyo caymiska aad ka hesho isticmaalkooda. Marka aad isticmaashid nidaamyadan, waxaad oggolaanaysaa in aad u hoggaansantid sharciyada khuseeya qofka isticmaalaya nidaamyadaas iyo caymis kujirida ay u helaan natiijo ahaan.

Qaanuunka Qaranka Ee Kusaabsan Isdiiwaan gelinta Coddeeyaha ee 1973 wuxuu uga baahanyahay dhammaan gobolada in ay ka bixiyaan caawimaada isdiiwaan gelinta coddeeyaha tooska xafiisadooda caawimaada dadweynaha. Codsashada diiwaangelinta ama diidista diiwaangelinta si loo codeeyo ma saameyn doonto xaq-u-yeelashadaada caymiska ee dheefaha iyo adeegyada ama dheefaha laga bixiyay hay'adaheenna. Waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u codeyso **vote.wa.gov** ama dalbo foomamka diiwaangelinta cod-bixiyaha adiga oo wacaya 1-800-448-4881.

Qaanuunka Masuuliyada iyo Ceymiska Caafimaadka La qaadi karo (HIPAA) xadadka ka mamnuucaya Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in ay kala hadlaan macluumaadka caafimaadka ku saabsan adiga iyo xubin kasta oo qoyskaaga ka tirsan in ay cidkale la wadaagaan, ay ku jirto wakiil la oggolaaday, aan ka ahayn haddii uu qofku leeyahay awood qareen ama aad sixiixdid foom oggolaansho oo sheegaya in daaha laga qaado macluumaadkan. Tan waxaa ka mid ah bixinta macluumaadka caafimaadka dhimirka, HIV, AIDS, natiijooyinka baaritaanka STD, ama daaweynta iyo ku tiirsanaanta kiimikada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda asturnaanta HBE, Booqo **wahealthplanfinder.org/_content/PrivacyPolicy.html**

Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo wuxuu ka hortagayaa HBE, HCA, iyo DSHS in ay macluumaadka shakhsi ahaan la isku aqoonsan karo (PII) ee ku saabsan adiga ama xubin kastoo ka tirsan reerkaaga ay siiyaan qof walba ee aan loo oggolayn in uu helo, iyo oggolaanshahaaga la'aantiisa.

Macluumaadka aad siinayso HBE, HCA, iyo DSHS waxaa ku waajiba xaqiijinta saraakiisha dowladaha federaalka iyo gobolka iyadoo ujeeddadu tahay go'aaminta xaq-u-yeelashadaada caymiska daryeelka caafimaadka. Xaqiijinta waxaa ka mid noqon kara dib-u-eegisyada xaq-u-yeelashada ka-dib iyo la-socoshada shaqaalaha hay'adda.

Haddii aad bilowdo buuxinta codsiga caymiska caafimaadka iyada oo loo marayo Washington Healthplanfinder oo aadan dhammeystirin nidaamka sabab kastaba ha ahaatee, macluumaadkaaga waxa lagu kaydin doonaa Washington Healthplanfinder waxaadna heli kartaa 90 maalmood. Haddii aadan buuxin codsiga ka dib 90-ka maalmood, macluumaadkaaga waa laga tirtiri doonaa Nidaamka Washington Healthplanfinderh.

HBE, HCA, iyo DSHS mas'uul kama ahan maareynta qorshahaaga ceymiska caafimaadka. Sidahaaga caymiska caafimaadka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dheefahaaga.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan shuruudaha qorshahaaga caymiska caafimaadka, oo ay ku jiraan faa'iidooyinka aad xaq u leedahay, kharashyada jeebka ee qorshahaaga, iyo samaynta dacwad faa'iido ama rafcaan ka qaadashada diidmada dheefaha, waa inaad la xiriirtaa sidahaaga caymiska caafimaadka. Haddii aad u qalanto COBRA ka dib joojinta caymis kasta oo caymis caafimaad oo laga soo iibsaday Washington Healthplanfinder, maamulaysa COBRA oo ku siinaya ogeysiisyada COBRA ee loo baahan yahay ogeysiisyada iyo xilliyada doorashada waa mas'uuliyadda loo-shaqeeyahaaga.

Ha burin caymis kasta oo hadda jira ama ha diidin faa'iidooyinka COBRA ilaa aad ka hesho warqad oggolaansho iyo siyaasadda caymiska, oo sidoo kale loo yaqaan qandaraas ama shahaado caymis, sidaha caymiska aad dooratay. Hubi inaad fahantay oo aad ogolaatay shuruudaha siyaasadda, fiiro gaar ah u yeelo taariikhda dhaqangalka ah, muddada sugitaanka, qaddarka caymiska, faa'iidooyinka, xaddidaadda, ka saarista, iyo raacayaasha.

2. Washington Apple Health oo kaliya

Xuquuqdaada

Washington Health Benefit Exchange iyo Health Care Authority waa in ay:

Kuu sharxaan xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga haddii aad weyddiiso.

Kuu oggolaanaa in aad soo gudbiso codsi qayb ahaan ah oo ku qoran ugu yaraan, magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga ama saxiixa wakiilka idman ee codsadaha. The day we get a partial application is your application date, which may affect when your coverage becomes effective. Maalinta aan helno arjiga qayb ahaan waa taariikhda codsigaaga, taas oo saamayn karta marka caymiskaagu noqdo mid hirgala.

Kuu oggolaadaan in aad codsato ama soo gudbiso codsi qayb ahaan ah adiga oo adeegsanaya hab kasta ee loo xusay si waafaqsan WAC 182-503-0005.

Si degdeg ah uga shaqeeyaan codsigaaga ugu dambeyn waqtiyada lagu qeexay WAC 182-503-0060.

Ku siiyaan 10 maalmood oo kuwa kaalandarka ah waxaan u baahanahay in aan xaq-u-yeelashada go'aamino. Haddii aad codsato wakhti dheeraad ah, waxaanu ku siin doonaa wakhti dheeraad ah. Haddii aadan macluumaadka ina siin ama aadan ina weyddiin waqti dheeraad ah, waxaan diidi karnaa, xiri karnaa, ama wax ka beddeli karnaa caymiska daryeelkaaga caafimaadka.

Kaa caawiyaan haddii ay dhibaato kaa haysato helista macluumaad ama caddayn loo baahan yahay si aan go'aan uga gaarno haddii aad xaq u leedahay. Haddii aynu u baahano dukumeenti adiga lacag kuugu fadhiya, waynu kuu soo diri doonaa waxaana kaa bixin doonaa lacagta.

Ku soo ogeysiiyaan, xaaladaha intooda badan, ugu yaraan 10 maalmood ka hor inta aanan joojin caymiskaaga daryeelka caafimaad.

Ku siiyaan go'aanka xaq-u-yeelashada oo qoraal ah, xaaladaha badankooda, 45 maalmood gudahooda. Caymis kujirida daryeelka caafimaadka loogu talogalay xaaladaha naafooyinka qaarkooda waxay qaadan kartaa illaa 60 maalmood. Waxaynu ku bixinaa go'aan qoran ee kusaabsan caafimaadka uurka gudaha 15 maalmood.

Kuu oggolaadaan in aad diido la hadalka baare haddii aan baarno kiiskaaga. You do not have to let an investigator into your home. You may ask the investigator to come back at another time. Codsigaasi ma ahan mid saamaynaya u qalmitaankaaga aad u qalantid caymis kujirida daryeelka caafimaadka.

Sii wadaan caymiska Washington Apple Health marka aynu sii go'aansanayno haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo aadan u qalmin barnaamij kale ee ah WAC 182-504-0125.

Ku siiyaan adeegyo loo siman yahay sida lagu qeexay WAC 182-503-0120 haddii aad u qalanto.

Mas'uuliyadahaaga

Waa in aad:

Ka warbixisid isbeddelada hadba sida loogu baahan yahay loogu baahan yahay WAC 182-504-0105 iyo WAC 182-504-0110 30 maalmood gudahooda ee isbeddelka. Akhri warqadaada ansixinta si aad u aragto isbedelada ay tahay inaad ka warbixiso.

Sameysaa dib-u-cusboonaysiinyada marka lagu weyddiisto.

Siisaa bixiyayaasha caafimaadka macluumaadka loo baahan yahay si ay noogu soo dallacaan adeegyada daryeelka caafimaadka.

Codsataa Medicare haddii aad xaq u leedahay.

Iskaashi la yeelataa shaqaalaha HCA marka laga codsado.

Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid

Marka aad weyddiisato ama aad hesho Apple Health, waxaad gobolka Washington siinaysaa dhammaan xuquuqaha taageero kastoo caafimaad iyo lacag-bixinnada dhinac-saddexaad kasta ee loogu talagalay daryeelka caafimaad.

- **Wakaaladdu way wadaagi kartaa** taariikhda tallaalka ilmahaaga Nidaamka Dabagalka Tallaalka Profile-ka ee Ilmaha.
- **Macluumaadka aad ka warbixiso** waxaa laga yaabaa in la siiyo DSHS si ay u go'aamiso u-qalmitaanka iyo faa'iidooyinka bilaha ah ee barnaamijyada sida caymiska daryeelka caafimaadka, kaalmada lacagta caddaanka ah, kaalmada cuntada iyo kaalmada daryeelka ilmaha.

Sharci ahaan, Gobolka Washington wuxuu soo celin karaa qiimooyinka lagu bixiyay noocyo gaar ah ee loogu talogalay adeego caafimaad ee ka ahaada gurigaaga ee ah tooska Celinta Guriga (RCW 41.05A.090, RCW 43.20B.080, iyo Cutubka 182-527 WAC). Celinta Guriga macnaheedu ma ahan mid dhacda illaa kadib marka aad dhimatid, dhimashada ninkaaga/xaaskaaga nool, oona carruurtaada nool ay da'doodu tahay 21 sanno ama ka wayn. Sidoo kale ma dhacayso haddii ilmo nooli uu yahay indhoole/naafo wakhtiga aad dhimanaysid. Qiimooyinka lasoo celin karo waxaa kamid ah:

- Adeegaha gaarka ah ee muddada-dheer ee Washington Apple Health iyo taageerooyin, haddii aad tahay da'da 55 ama ka wayn wakhtiga aad qaadatay adeegaha;
- Qaar ka mid ah adeegyada gobolka oo kaliya uu maalgeliyo, iyadoon loo eegayn da'daada wakhtiga aad heshay adeegyada..

Waxaad ka heli kartaa liis ay ku qoranyihiin adeegaha u hoggaansan qiimo celinta hoosta WAC 182-527-2746. Waxaad ka heli kartaa liis ay ku qoranyihiin hantida laga reebay dib u celinta hoosta WAC 182-527-2754. Dowladda gobolka waxaa sidoo kale laga yaabaa in ay soo gudbiso rahamad dhimashada ka hor oo loogu talagalay in dib loo helo dhimashada ka-dib, waxaanna ku waajiba shuruudaha xeerka 42 U.S. Code 1396p. Dhulalka qabiilka iyo hanti maguurtada ah qaarkood ee ay iska leeyihiin Hinddida Mareykanka iyo Dadka Asaliga ah ee Alaska waxaa laga dhaafi karaa dib u helidda (WAC 182-527-2754). Gobolka wuxuu celin karaa iibinta guriga, ama hantidaada, aan ka ahayn:

- Xaaskaaga ku nool hantida;
- Walaalkaaga ku nool guriga, uu yahay mid kula leh-guriga, oona kasoo baxa shuruudaha qaarkooda.
- Ilmahaagu ku noolyahay guriga, oona yahay mid indhoole/naafo ah; ama
- Ilmahaaga uu ku noolyahay guriga oona ka yaryahay da'da 21.

Waxaad ka heli kartaa liiska adeegyada ku waajiba kharash soo-celinta hoosta xuquuqda sii haysashada hantida geerida ka hor ee xeerka WAC 182-527-2734.

Waxaa dhici karta in laguugu koobo hal daryeel caafimaad bixiye, farmashiye, iyo/ama isbitaal haddii aad raadinaysid adeego daryeel caafimaad aan lagama maarmaan ahayn oo ay bixiyaan daryeel bixiyayaal.

3. Qorsheyaasha Qualified Health oo kaliya

Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid

Haddii aad ku qoran tahay qorshaha qualified health oo loo marayo Washington Healthplanfinder oo aadanna bixin macluumaad ku filan xaqiijinta xaq-u-yeelashadaada, waxaad heli doontaa 90 maalmood oo aad ku bixinayso macluumaad dheeraad ah oo aad kaga soo baxayso shuruudaha xaq-u-yeelashada. Lacag-bixinno kasta ee hore oo ah canshuur dhaaf la bixiyay iyadoo adiga wakiil lagaa yahay waxaa ku waajiba iswaafajin.

Haddii aad leedahay Lambarka Damaannada Bulshada (SSN), waa in aad ku sheegtaa codsigaaga. Haddii aadan lahayn SSN, waxaad weli caymis caafimaad ka iibsan kartaa Washington Healthplanfinder. Waxaan macluumaadkan u adeegsanaynaa in aan ku hubino haddii aad xaq-u-leedahay caymiska daryeelka caafimaadka annaga oo xaqiijinayna aqoonsigaaga, muwaadinimadaada, xaalkaaga socdaalka, taariikhdaada dhalashada, iyo helitaanka caymiska kale ee daryeelka caafimaadka. Lama wadaagayno macluumaadkan wakaalad socdaal kale. SSN ayaa loogu baahan yahay canshuur dhaafka iyo barnaamijyada qaarkood.

Haddii aadan bixin Lambarka Damaannada Bulshada ee loogu talagalay naftaada ama qof reerkaaga ka tirsan, waxaan u baahan karnaa in aan kuula soconno si aan kaaga helno macluumaad dheeraad ah.

Haddii aad ku qorantahay qorshaha qualified health ee loo marayo Washington Healthplanfinder oo dakhligaaguna uu isbedelay, waa in aad sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragalka ah noo soo ogeysiisaa. Isbeddelka ku yimaada dakhliga ayaa wax ka beddeli kara canshuur dhaafka ama dhimista kharash-wadaagga ee aad xaq u leedahay. Waxaad xaq u yeellan kartaa qorshe qiimo-jaban ka-dib marka uu dakhligu isbeddelo, ama waxaa lagaaga baahan karaa in aad dib u bixiso qayb ka mid ah canshuur dhaafka ee aad hesho haddii dakhligaagu uu sii kordho, oo aadanna isbeddelka soo sheegin.

Waxaad soo sheegi kartaa isbeddelka dakhlig adiga oo soo galaya akoonkaaga Washington Healthplanfinder ka-dibna dooranaya "Isbeddelka Soo Sheeg/Report a Change." Si aad caawimaad u hesho, ama si aad telefoonka noogu soo wargeliso, ka wac Xarunteenna Taageerada Macmiilka lambarkan 1-855-923-4633.

Reconciling deymaha canshuurta is loo baahanyahay: Dib u heshiisiinta canshuur celinta ayaa loo baahan yahay IRS. Waxa aad tan samaynaysaa adiga oo xeraynaya cashuur celinta IRS-ta sanadlaha ah oo ay ku jiraan foomamka IRS-ta saxda ah. Ku guuldareysiga inaad u soo sheegto dhibcaha canshuurta IRS waxay kaa ilaalin doontaa inaad hesho dhibcaha canshuurta mustaqbalka. Macluumaad dheeraad ah akhri tilmaamaha lagu siiyey foomamka IRS 1095 iyo 8962.

Kharashyada caymiska caafimaadka ee la muujiyey way is beddeli karaan: Kharashyadu way is beddeli karaan iyadoo lagu salaynayo dhaqammada qoraal-qorista sidaha caymiska caafimaadka iyo doorashadaada ikhtiyaar kasta oo jira.

Qiimayaasha la muujiyay waxaa kaliya loogu talagalay taariikhdaada dhaqangalka ee la codsadey. Qiimaha lacagtaada joogtada ah ee caymiska wuxuu ku xiran yahay da'da dadka reerkaaga. Haddii xubin reerkaaga ka tirsan ay taariikhdiisa dhalashada u dhaxeyso waqtiga aad dib-u-eegtay qorshaha iyo waqtiga qorshahaagu bilaabanayo (taariikhda dhaqangalka), kharashka lacagtaada caymiska joogtada ah wuu kordhi karaa. Shirkadda caymiska ee aad dooratey waxaa laga yaabaa in aysan damaannad-qaadin qiimayaashooda ee waqti kasta. Caymiskaaga ma noqon doonna mid shaqeeya ilaa caymiyahaaga uu ka xaqiijiyo helidda lacag-bixinta.

Oggolaanshahaaga in Waaxda Damaannada Shaqada ee Gobolka Washington u sii deyso mushaarkaaga iyo xogta shaqadaada HBE. Waxaad qireysaa in oggolaanshaha fasaxan uu gacan ka geysan doonno fududeynta hannaanka codsiga iyo dib-u-go'aaminta ee Washington Healthplanfinder. Macluumaadkaaga shakhsiyeed waa la ilaali doonaa sida lagu sharxay Siyaasadeena Asturnaanta. Ka eeg siyaasadda asturnaanta HBE bartan **wahealthplanfinder.org/us/en/privacy-policy.html**.

4. Cabasho Soo Gudbi

Si waafaqsan sharciga Federaalka iyo siyaasadda Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (HHS), hay'addan waxaa ka mamnuuc ah in ay sameyso takoor ku saleysan isir, midab, asalka qaran, jinsi, da', diin, aaminsanaan siyaasadeed, ama naafonimo. Si aad u soo gudbiso cabasho ku saabsan takoor, la xiriir HHS.

Regional Manager,
Office for Civil Rights
U.S. Department of Health and Human Services
2201 Sixth Ave. M/S: RX-11
Seattle, WA 98121-1831
Telefoonka: 1-800-368-1019
TDD: 1-800-537-7697
Fakis: 206-615-2297

Waxaad sidoo kale cabashada xuquuqda madaniga ah u gudbin karta Xafiiska Xuuqaha Madaniga ah, ee HHS.

Washington State Health Care Authority

[English] Language assistance services, including interpreters and translation of printed materials, are available free of charge. Call 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Amharic] የቋንቋ እገዛ አገልግሎት፣ አስተርጓሚ እና የሰነዶችን ትርጉም ጨምሮ በነጻ ይገኛል። 1-800-562-3022 (TRS: 711) ይደውሉ።

[Arabic] خدمات المساعدة في اللغات، بما في ذلك المترجمين الفوريين وترجمة المواد المطبوعة، متوفرة مجاناً، اتصل على رقم 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Burmese] ဘာသာပြန်ဆိုသူများနှင့် ထုတ်ပြန်ထားသည့် စာရွက်စာတမ်းများဘာသာပြန်ခြင်းအပါအဝင် ဘာသာစကားအထောက်အကူဝန်ဆောင်မှုများကို အခမဲ့ရနိုင်ပါသည်။ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ကိုဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

[Cambodian] សេវាជំនួយភាសា រួមមានទាំងអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ និង ការបកប្រែឯកសារបោះពុម្ព គឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ។ ហៅទូរស័ព្ទទៅលេខ 1-800-562-3022 (TRS: 711)។

[Chinese] 免费提供语言协助服务，包括口译员和印制资料翻译。请致电 1-800-562-3022 (TRS: 711)。

[Farsi (Persian)] خدمات کمک زبانی، از جمله مترجم شفاهی و ترجمه اسناد و مدارک (مطالب) چاپی، بصورت رایگان ارائه خواهد شد.با شماره 1-800-562-3022 (TRS: 711) تماس بگیرید.

[French] Des services d’aide linguistique, dont des interprètes et la traduction des documents, sont disponibles gratuitement. Appelez le 1-800-562-3022 (TRS : 711).

[Korean] 통역 서비스와 인쇄 자료 번역을 포함한 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-800-562-3022 (TRS: 711)번으로 전화하십시오.

[Laotian] ການບໍລິການດ້ານພາສາ, ລວມທັ້ງນາຍແປພາສາ ແລະ ການແປເອກະສານຕີພິມ, ມີໄວ້ໃຫ້ຟຣີໂດຍບໍ່ຄິດຄ່າ. ໂທຫາເລກ 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Pashto] په انګليسي ژبه باندې دپوهېدلو، په شمول د ژباړونکي او د چاپ شوي موادو ژباړه کولو د مرستې خدمتونه، پرته له تادیې په وړیا توګه شتون لري. دي خدمت ته لاسرسي موندلو لپاره دي شمېرې 1-800-562-3022 ته زنګ ووهئ (د اوریدلو یا خبرو کولو معلولیت لرونکي خلکو د زنګ وهلو شمېره (TRS): 711)

[Portuguese] Serviços de assistência linguística, incluindo interpretação e tradução de versões impressas, estão disponíveis gratuitamente. Ligue para 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Punjabi] ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ—ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਅਤੇ ਪ੍ਰਿੰਟ ਕੀਤੀ ਹੋਈ ਸਮੱਗਰੀ ਦੇ ਅਨੁਵਾਦ ਸਮੇਤ—ਮੁਫ਼ਤ ਉਪਲੱਬਧ ਹਨ। 1-800-562-3022 (TRS: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

[Russian] Языковая поддержка, в том числе услуги переводчиков и перевод печатных материалов, доступна бесплатно. Позвоните по номеру 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Somali] Adeego caawimaad luuqada ah, ay ku jirto turjubaano afka ah iyo turjumid lagu sameeyo waraaqaha la daabaco, ayaa lagu helayaa lacag la’aan. Wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Spanish] Hay servicios de asistencia con idiomas, incluyendo intérpretes y traducción de materiales impresos, disponibles sin costo. Llame al 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tagalog] Mga serbisyong tulong sa wika, kabilang ang mga tagapagsalin at pagsasalin ng nakalimbag na mga kagamitan, ay magagamit ng walang bayad. Tumawag sa 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tigrigna] ተርጎምትን ናይ ዝተፅሓፉ ማተርያላት ትርጉምን ሓዊሱ ናይ ቋንቋ ሓገዝ ግልጋሎት፤ ብዘይ ምንም ክፍሊት ይርከቡ።
ብ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ደውሉ።

[Ukrainian] Мовна підтримка, у тому числі послуги перекладачів та переклад друкованих матеріалів, доступна безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Vietnamese] Các dịch vụ trợ giúp ngôn ngữ, bao gồm thông dịch viên và bản dịch tài liệu in, hiện có miễn phí. Gọi 1-800-562-3022 (TRS: 711).